Codsigan waa FoodShare ee ma aha codsiga Medicaid, BadgerCare Plus, Family Planning Only Services, Wisconsin Shares (child care assistance), ama Wisconsin Works (Helista Shaqada) (W-2). Barnaamijyadaas ayaa kaa caawinaya kharashka caafimaadka ama xannaanada ama helista shaqo. Waxaad codsan kartaa BadgerCare Plus, Family Planning Only Services, Medicaid, iyo Wisconsin Shares oo aad ka helayso barta oonleenka ah ee access.wi.gov isla marka aad codsanayso FoodShare. Waxaa qasab ah inaad la xariirto wakaaladaada si aad u codsato W-2.

FoodShare waa xuquuq macnaheedu yahay in la caawiyo dadka dakhligoodu hooseeyo ee ay ku adag tahay in ay cunto helaan iyo inay helaan kharashka bil kasta ee noloshooda. Ma ahan inaad codsato W-2 ama barnaamijyo kale si aad u hesho gunooyinka FoodShare. Qoysku waxa uu caadiyan ka kooban yahay dad isku meel ku nool oo wadaaga cuntada. Cadadka gunooyinka FoodShare ee aad hesho waxay ku xiran tahay tirada qoyska, kharashaadkooda, iyo lacagta soo gasha. FoodShare waxaa lagu bixiyaa kaarka QUEST ee Wisconsin, oo waa mid sidii kaar bangi oo kale loogu isticmaalo dukaamada ama suuqyada beeraleyda ee qaata FoodShare.

SHURUUDAHA SOO-SHEEGIDDA

Waxaa lagaa rabaa in aad soo sheegto haddii uu dakhliga guud ee qoyska ee bishii ka sarreeyo 130% federal poverty level (heerka saboolnimada federaalka) marka loo eego tirada qoyska.

Waa in aad soo sheegto helista lacagta bakhtiyaanasiibka ama marka aad ku guuleysato khamaar hal ciyaar, sharad, ama tigid canshuurta ka hor ama wixii lagaa gooyo.

Adiga ama qof qoyska ka tirsan ayaa buuxin kara shuruudaha shaqada ee FoodShare mar ka mid ah wakhtiga dibu-eegista shahaado si aad u sii qaadan kartaan FoodShare. Si aad u buuxiso shuruudaha shaqada, waa in aad shaqeyso ama ka qeybgasho barnaamij shaqo ugu yaraan 80 saac bishii. Haddii ay saacadahaaga shaqada ka yar yihiin 80 saac bishii waa in aad soo sheegto.

XUBIN FOODSHARE KAMID AH AHAAN, WAXAAD LEEDAHAY XAQ IYOR WAAJIBAAD.

Xaquuqda aad leedahay waxaa kamid ah:

- Xaqa aad u leedahay in lagu soo ogeysiyo xaalada diiwaanka codsigaaga muddo 30 bari gudahood ah.
- Xaqa aad u leedahay inaad gunooyinka aad ku hesho tadobo bari gudahood haddii aad u qalmatid caawimaada degdega ah.
- La iskuma takoori karo waayeenimo ama isir, midab, asalkii hore, jinsi (sida aqoonsi jinsiyeed iyo dookha jinsiga), caqiido diimeed, naafanimo, da', arrimo siyaasad, ama aargoosi/aarsasho la xiriirta arrimo hore oo la xiriiri xuquuqda madaniga ah.

Waxaad masuul ka tahay:

- Inaad su'aalaha codsiga dhamaantood oga jawaaabto si buuxda oo daacad ah, aadna saxiixdo magacaaga si loo caddeeyo, adoo og in lagu ciqaabaayo haddaad been sheegto, iyo in dhamaan jawaabahaagu yihiin kuwo sax ama aan qalad lahayn. Waxaa ka mid ah macluumaadka ku saabsan dhalashada iyo sharcigaa soogalootiga ee dadka codsanaya kaalmada.
- Inaad bixiso dhamaan macluumaadka caddeynta si loo go'aamiyo inaad u qalantid.
- Inaad isbadelka loo baahan yahay kusoo gudbisno waqtiga loogu talagalay ee ku qoran warqadaada.
- Inaad iibin, ka ganacsan, ama aadan cid kale siin gunooyinka.
- U adeegsiga gunooyinka FoodShare kaliya in aad ku iibsato waxyaabaha loogu talagalay.

Dadka jabiya xeerarka FoodShare ayaa loo diidi karaa barnaamijka, ganaax la saari karaa, xabsi la galin karaa, ama dhammaan sadexdaba. Wixii faahfaahin ah oo ku saabsan xaquuqdaada ama waajibadaaga, ka eego barta www.dhs.wisconsin.gov/library/collection/f-10150b.

OGEYSIIS QORAN

Waxaad xaq u leedahay ogeysiis qoraal ah ood ka hesho wakaaladaada kahor intaan wax talaabo ah la qaadin si loo joojiyo ama loo yareeyo gunooyinkaaga FoodShare. Inta badan tallaabooyinka, waxaad helaysaa waraaq ugu yaraan 10 maalmood kahor intaan talaabada la qaadin.

DACWAD-DHAGEYSI CADDAALEDEYSAN

Waxaad xaq u leedahay dhageysi cadaalad ah haddii aadan ku qancin ficiil kasta oo ay sameeyso wakaaladu. Waxaad codsan kartaa dhageysiga cadaalada ah oo maqal ah adoo wacaaya 608-266-7709. Waxaad sidoo kale soo dirsan kartaa foomka codsiga dhageysiga cadaalada ah ama warqad aad ku codsanayso dhageysiga cadaalada ah adoo fakis ahaan kusoo diraya lambarkaan 608-264-9885 ama iimayl usoo dir:

Department of Administration
Division of Hearing and Appeals
PO Box 7875
Madison, WI 53707-7875

Codsiga waa in lagaa helo **90 maalmood** gudahood si xafiisku kuugu bilaabo FoodShare **ama**, haddii aad ku qancin weydo kaalmada FoodShare, mar kasta oo aad rabto intaad qaadaneyso manaafacaadka lagu oggolaaday.

Foomka codsiga Dhageysiga Cadaalada ah waxaa laga soo degsan karaa

www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm, ama waxaad wici kartaa wakaaladaha ku qoran warqadaada codsiga dacwada.

Xaaladaha inta badan, haddii codsigaaga dhagaysiga cadaalada ah ay helaan Division of Hearings and Appeals (Waxda Dhageysiga Dacwada iyo Racfaanada) kahor taariikhda tallaabada ficilku dhacaayo, gunooyinkaaga FoodShare ma joogsanaayo ama lama dhimaayo. Waxaad waydiinsan kartaa in gunooyinkaagu sii socdaan, ugu yaraan illaa la gaaro go'aanka racfaankaaga. Inta lagu jiro waqtigaan, haddii ay dhacaan isbadalo kale oo aan quseen, waxaa isbadel ku imaan kara gunooyinkaaga FoodShare. Haddii uu is-beddel kale dhaco, waraaq cusub ayaad heleysaa. Haddii aad ku qanci weydo go'aanka dacwad-dhageysiga, waxaad codsan kartaa racfaan dacwad-dhageysi labaad. Haddii uu go'aanka dacwad-dhageysiga kaa joojiyo ama kaa yareeyo cuntada, waxaa dhici karta inaad dib u soo celiso wixii aad qaadatay intii uu racfaanku kuu socday. Waxaad codsan kartaa inaad helin gunooyinka lasii wadaayo.

Waxaad wakiil ka noqon kartaa naftaada ama waxaa wakiil lagaaga noqon karaa dhageysiga dacwada ayadoo uu kaaga noqonaayo qareen, saaxiib, ama qof kale oo aad dooratay. Ma bixin karno kharashka qareenkaaga. Hase yeeshee, adeeg sharci oo bilaash ah ayaa lagu heli karaa haddii aad u qalantid. Si aad wax badan oga ogaatid adeega sharci ee bilaashka ah, wax 888-278-0633.

Haddii aad ku guuldareysatid inaad kasoo hor muuqato ama wakiilkaagu kasoo hor muudqo dhageysiga dacwada ayadoo uusan jirin sabab rasmi ah, racfaankaaga waxaa loo aqoonsanaa in la iska daayay ama waaba la joojinayaa.

MASUULKA SHARCIGA AH, DARYEELE, AMA WARQADA OGGOLAANSHAHA QAREENKA

haddii aad leedahay masuul sharci ah, daryeele, ama aad haysatid warqada oggolaanshaha qareenka, qofkaas waxa uu kuu buuxin karaa ama kusoo gudbin karaa foomkaan asagoo adiga ku matalaaya. Qofkaas sidoo kale waa inuu soo gudbiyo dukumiintiyada ku saabsan balanteeda ama balantiisa oo uu la socdo foomka.

MACLUUMAADKA DADKA/ISTICMAALKA SOCIAL SECURITY NUMBERS (SAGAALKA LAMBAR)/MACLUUMAADKA LAGU AQOONSAN KARO DADKA

Aruurinta macluumaadka, oo uu kujiro lambarka social security number (sagaalka lambar) ee qof kasta oo guriga kunool, waxaa lagu sharciyeeyay Food and Nutrition Act of 2008 (Xeer Sharciyeedka Nafaqada ee soo baxay 2008), waxna laga badelay, 7 U.S.C. 2011-2036. Macluumaadka waxaa loo isticmaali doonaa in lagu go'aamiyo in qoyskaagu u qalmo ama lasoo wadi karo u qalmida ka qayb qaadashada SNAP.

Macluumaadka waxaa loo isticmaali doonaa in lagu go'aamiyo in qoyskaagu heli karaan ama loo sii wadi karo gunooyinka.

Macluumaadka aad bixiso waxaa lagu xaqiijin doonaa barnaamijyada kujira kumbuyuutarka. Macluumaadkaan waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa in lagu kormeero sharciyada barnaamijka iyo maareynta barnaamijka.

Macluumaadkaan waxaa loo bandhigi karaa wakaaladaha kale sida dawlada federaalka ama wakaaladaha gobalka si baaritaan rasmi ah loogu sameeyo iyo in loo adeegsado fulinta sharciga gaar ahaan dadka la cararaya sharciga.

Haddii waxa ay SNAP sheegto ay kasoo horjeedo xaqiiqda dhabta ah ee reerkaaga, macluumaadka codsigaan, oo ay ku jiraan lambarka social security numbers (sagaalka lambar), waxaa laga yabaa in loo gudbiyo wakaaladaha federaalka, iyo sidoo kale wakaaladaha gaarka ah loo leeyahay, si ay ugu adeegsadaan hawlada sheegashada.

Bixinta macluumaadka lagaa rabo, oo ay kujiraan lambark social security numbers (sagaalka lambar) ee qof kasta oo guriga ka tirsan, waa ikhtiyaari. Hase yeeshee, markaad keeni weydo lambarka Social Security number (Sagaalka Lambar) waxaa lagu diidayaa SNAP oo waxaa loo diidaa qof kasta oo sabab la'aan keeni waaya lambarka Social Security number (Sagaalka Lambar). Lambar kasta oo Social Security numbers (Sagaalka Lambar) oo la keeno waxaa loo adeegsanayaa isla sida loo adeegsado lambarka Social Security numbers (Sagaalka Lambar) ee qoyska xaq u yeesha.

Lambarka social security number (sagaalka lambar) looma gudbinayo United States Citizenship and Immigration Services (Adeegyada Soogalootiga iyo Jinsiyadda ee Mareykanka ama USCIS).

FoodShare laguma xisaabiyo kharash dadweynaha marka la isu oggolaan waayo.

XAALADA SOOGALOOTIGA

Si aad ugu qalantid FoodShare, waxaa qasab kugu ah inaad tahay muwaadin Maraykan ah ama inaad haysatid sharci socdaal oo u qalma ayna bixisay USCIS. Sharciga soogalootiga ee dadka soo codsada FoodShare waxaa laga soo xaqiijin doonaa USCIS baarashada SAVE oo waxay saameyn kartaa in lagu qoro manaafacaadka FoodShare. Xaalada socdaalka shaqsiga **lagama** soo xaqiijin doono USCIS qof kasta oo aan u qalmin FoodShare ama qof kasta oo sheegaya in inaysan ama inuusan u qalmin xaalada Socdaal ee USCIS. Hase yeeshee, dakhliga soo gala shaqsiyaadkaas waxa uu saameyn ku yeelan karaa diiwaankooda ama gunooyinkooda FoodShare.

DIB U EEGISTA XAKAMEYNTA TAYADA

Kiiskaaga FoodShare waxaa si qori tuur ah u xulan kara Wisconsin Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) si ay dib ugu adeegsato dib u eegista xakameynta tayada. Dib u eegista tayada FoodShare waa dib u eegis lagu sameeynaayo kiiskaaga FoodShare si loo hubiyo in wakaalada kaa qortay FoodShare inay si sax kuu siiyo gunooyinka ayna raacday sharciyada ay dejiisay dawlada federaalka. Sharciyada dawlada federaalka ayaa sheegaya inaad la shaqeyso laanta dib u eegista xakameynta tayada. Haddii aadan siin macluumaadka lagaa codsado aadna la shaqeen dib u eegista, waxaa laga yabaa kiiskaaga FoodShare la joojiyo. Haddii tani dhacdo, waxaa lagu sheegi doonaa inta kiiskaagu xirnaan doono.

SHARCIYADA AASAASIGA AH EE SHAQADA DA'DA 16 JIRKA ILAA 59 JIRKA

Dadka soo codsada FoodShare iyo da'da 16 jirka ilaa 59 jirka waa in ay u hoggaansamaan sharciyada shaqada oo ah shuruudda xaqu-yeelashada FoodShare haddii aan la iska dhaafin. In loo hoggaansamo shuruudca shaqada ee aasaasiga ah diiwaangelinta shaqada wakhtiga codsiga adigoo keenaya macluumaadka khuseeya xaalka ama helitaanka shaqada.

Waa in la iska cafin karaa shuruudca shaqada **haddii** ay jiraan waxyaabaha soo socda:

- Waxaad jirtaa 16 ama 17 sano mana tihid qofka koowaad ee kooxda u qalanta FoodShare.
- Waxaad jirtaa 16 ama 17 sano waxaadna tahay qofka koowaad ee kooxda FoodShare laakiin waxaad ka diiwaangashan tahay dugsi ama waxaad tahay shaqaale ama qof kujira tababar ugu yaraan muddo dhan maalin galinkeed.
- Waxaa la ogaaday inaad u qalmin shaqada. Tani waxay imaanaysaa haddii:
 - Haddii aad si jooqto ah ama si kumeel gaar ah u heshid gunooyinka naafada oo ay bixiyaan laamaha dawlada ama kuwa gaarka loo leeyahay.
 - Haddii wakaaladaadu oggaatay inaad maskax ahaan fiyoobeen ama muuqaal ahaan aadan awoodin inaad shaqeyso.
 - Haddii la xaqiijiyay inaad awoodin inaad shaqeyso sida ku xusan bayaanka xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ama shaqaalaha daryeelka.
- Haddii aad ka diiwaangashan tahay W-2 aadna u hogaansamaysaa shuruudaha shaqada ee W-2.
- Haddii aad tahay daryeelaha koowaad ee ilmaha ugu tiirsan ee da'diisu ka yartahay 6 sano (haddii ilmuhu ku nool yahay gurigaaga ama haddiiba uusan ku noolayn guriga). Hase yeeshee, Haddii adiga ama qof kale labadiinaba aad ilmaha u tihiin waalid ilaaliya, kaliya labadiina midkiin ayaa laga joojinayaa iska diiwaangelinta shaqada maadaama uu yahay daryeelaha koowaad ee ilmaha.
- Haddii aad tahay daryeelaha koowaad ee qof kale oo aan awoodin inuu is daryeelo ama isdaryeesho (haddii qofku ku nool yahay gurigaaga ama uu ku nool yahay banaanka guriga).
- Haddii aad codsatay ama heshay magdhawga shaqo la'aanta.
- Haddii aad si jooqto ah u cabtaa aalkohoolka ama muqaadaraad kale ama waxaa kujirtaa barnaamijka dhaqan celinta.
- Markaad shaqeyneyso 30 saac ama ka badan toddobaadkii ama marka uu mushaarkaaga toddobaadkii yahay \$217.50 ama ka badan.
- Haddii aad ku qoran tahay dugsi la aqoonsan yahay ugu yaraan maalin galinkeed, aad ka qaybqaadataa barnaamijka tababarka, ama machad waxbarasho oo sare.

Waxaa lagaa dooni karaa inaad wakaaladaada siiso caddeyn haddii aad la kulanto mid kamid ah xanibaadahaan. Inkasta oo laga soo bixi karo shuruudaha shaqada ee la iska rabo, in laga qeyb qaato shaqada khasab ma aha.

SHARCIGA AASAASIGA AH EE CIQAABTA SHAQADA

Haddii loo hoggaansami waayo shuruudaha shaqada iyadoo aan la iska cafin karin, lama heli karo manaafacaadka FoodShare ilaa iyo wakhti ciqaabid gaar ah oo cayiman. Waxaa ka mid ah haddii sameyn weydo mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:

- Inaad diidday dalab shaqo oo kugu habboonaa
- Inaad ka tagtay shaqo aad shaqeeynaysay 30 saacadood ama kasii badan asbuucii (ama shaqo kasta oo u dhiganta 30 saacadood asbuucii marka la eego mushaarka ugu hooseeya ee federaalka)
- Inaad yareeysay saacdahaaga kana dhigtay wax kasii yar 30 saacadood asbuucii (ama mushaarkaagu ka yaryahay 30 jeer mushaarka ugu yar ee federaalka)
- Inaad ka qaybqaadatay W-2 aadna kasoo bixin shuruudaha shaqada ee barnaamijka W-2
- Markaad codsatay lacagta shaqa-la'aanta laakiin aadan ka soo bixin shuruudaha shaqada ee barnaamijka ceymiska shaqa-la'aanta

Haddii, inta lagu jiray muddada xayiraada, aad u guurtay guri kale oo leh FoodShare, inta ka hartay mudda xayiraada qaybtaada waxaa loo wareejin doonaa gurigaas aad u wareegtay. Xadidka waqtiga Xayiraada waa:

- Xayirraada koowaad waa hal bil.
- Xayirraada labaad waa saddex billood.
- Xayirraada saddexaad waa lix billood ama xayiraada ku xigta.

Waxaad dhameyn kartaa waqtiga xayirraada muddo hore haddii aadan kasoo bixin shuruudaha iska diiwaangelinta shaqada. Waa inaad dib u codsato FoodShare haddii aad dooneyso inaad hesho gunooyinka kadib marka xayirraadu dhamaato. Haddii aad ka mid tahay kooxda FoodShare, waa inaad shaqaalahaaga u oggolaatid inuu cusbooneysiyo kiiskaaga halkii aad adigu dib ugu codsan lahayd.

FOODSHARE SHURUUDAHEEDA SHAQADA EE QAANGAARKA SHAQEYSAN KARA EE AH 18 JIR ILAA 54 JIR

Qaar kamid ah dadka waawayn oo do'doodu 18 illaa 54 oo aan haysan ilmo yaryar oo guriga kula nool ayaa kaliya heli kara xadidka gunooyinka saddexda bilood ee FoodShare muddo dhan 36 bilood (saddx sano) illaa ay kasoo baxaan shuruudaha shaqada FoodShare ama loo aqoonsado inaysan u qalmin. Shuruudaha shaqada waxay ka duwan yihiin shuruudaha sharciga aasaasiga ah ee la iska rabo.

Waxaa jira afar siyaabood oo looga soo bixi karo shuruudaha shaqada FoodShare ee ABAWDs:

- Shaqee ugu yaraan 80 saacadood bil kasta.
- Ka qaybqaado barnaamijyada dheeraadka ah ugu yaraan 80 saacadood bil kasta, sida:
 - FoodShare Employment and Training (Tababarka FoodShare iyo Helista Shaqada ama FSET).
 - W-2.
 - Workforce Innovation and Opportunity Act (Sharciga Fursadda lagu Helo Shaqada ama WIOA).
- Haysato shaqo noocaan ah (oo lagu bixiyo badeecad halkii looga bixin lahaa lacag) ama si ikhtiyaari ah u shaqee muddo dhan 80 saacadood bil kasta.
- Inaad leedahay isku darka shaqada, shaqo badeeco lagu bixiyo, mid ikhtiyaari ah, ama inaad ka qaybqaadatid barnaamijyada dheeraadka ah aadna ka shaqeytid ugu yaraan 80 saacadood bil kasta.

Waxaad heli doontaa macluumaadka barnaamijka FSET haddii lagaa diiwaangeliyo FoodShare.

Waxaa lagu arki karaa inaad u qalmin ama aadan kasoo bixin shuruudaha shaqada haddii mid kamid ah waxyaabahaan soosocda ay sax yihiin:

- Markaad la nooshahay ilmo ka yar 18 jir oo ka tirsan qoyska oo qaata FoodShare, xataa haddii uusan ilmahaasi xaq u lahayn FoodShare.
- Markaad tahay daryeelaha koowaad ee qof aan is daryeeli karin (haddii uu qofku ku nool yahay iyo haddii uusan ka nooleyn gurigaaga).
- Markaad tahay daryeelaha koowaad ah ee ilma aad masuul ka tahay oo ka yar 6 jir (haddii uu ilmuhu guriga ku nool yahay iyo haddii uusan ka nooleyn). Hase yeeshee, haddii adiga ama qof kale aad ilmaha u tihin waalid ilaaliya, midkiin ayaa laga deynayaa shuruudda shaqada FoodShare ee laga rabo inta uu yahay daryeelaha koowaad.
- Marka aadan maskax ahaan ama jir ahaan awoodin in aad shaqeyso.
- Haddii aad tahay darbijiif aan guri haysan. Waxaa ku jira dadka ku nool guri meelgaar ah, sida qaab nololeed ha meelgaar iyo hoy ah gabbaad, ama si meelgaar ah dad kale ula jooga (ilaa 90 maalmood) qof kale guri uu leeyahay.
- Markaad tahay haweeney uur leh.
- Waxaad heshaa ama codsatay lacagta shaqa-la'aanta.
- Haddii aad qeyb ka tahay alcohol or other drug abuse (aalkolo ama maandooriye kale ama AODA) ama aad ku jirto barnaamij ah baxnaanin.
- Haddii aad ugu yaraan dhigato iskuul la aqoonsan yahay ama tacliin sare maalin barkeed.
- Haddii aad tahay 18 jir ama ka weyn oo aad dhigata dugsi sare ugu yaraan maalin barkeed.
- Haddii aad ku jirto W-2 oo aad ka soo baxayso shuruudaha W-2.
- Markaad shaqeyso ilaa 30 saac ama ka badan toddobaadkii ama marka uu mushaarkaaga toddobaadkii yahay \$217.50 ama ka badan.
- Haddii aad tahay 18 ilaa 24 jir la joogi jiray qoys ilmaha korsada, waalid lacag lagu siiyo, ama amar maxkamad oo ah in ay qaraabo ku koriyaan, markii aad 18 jirsatay.
- Haddii aad tahay ciidan hawlgabay. Hawlgabka ciidanka waa qof ka soo shaqeeyey Ciidanka Qalabka Sida ee Mareykanka (sida Xoogga, Mariinada, Badda, Ciidanka Cirka, Dayaxgacmeedka, Ilaalada Xeebaha, Ciidanka gobolka ee Keydka, iyo Ciidanka Qalabka Sida ee Keydka) markaad sabab u soo hawlgabtay.

Oggoow: Waxaa lagaa rabi karaa inaad bixiso caddeyn sheegaysa inaad shaqeyn karin.

XARUNTA SHAQADA

Xarunta Shaqada diyaar ayay kuu tahay. Xarunta Shaqada waa ilaha ugu wayn ee shaqada laga helo kana furan gobalka Wisconsin. Booqo websetka Xarunta Shaqada oo ah jobcenterofwisconsin.com, ama waxaad isticmaali kartaa kumbuyuutarka dhalada laga taabto ee yaala xaruntaada shaqada ee maxaliga ah. Si aad u heshid xarunta shaqada ee kuugu dhaw, wac 888-258-9966 (Iambarka bilaashka ah).

HUBINTA KUMBUYUUTARKA

Macluumaadka codsigaaga waxa uu ku xirnaan doonaa xaqiijinta dakhliga gobalka iyo u qalmida nidaamka xaqiijinta. Haddii aad shaqeysid, dakhliga shaqada kaasoo gala iyo mushaarka aad soo gudbiso waxaa hubin doona kumbuyuurtarka asagoo ku eegaya mushaaraadka shaqaalaha ay usoo gudbiyaan Department of Workforce Development (Waxda Horumarinta Shaqaalaha). IRS, Social Security Administration (Maamulka Hawlgabka Dadweynaha), iyo Unemployment Insurance Division (Qeybta Ceymiska Shaqa-la'aanta) waxaa sidoo kale lagala xariirayaa lacagta iyo dakhliga guud ee aad haysan karto. Macluumaadka xafiisyadaas waxay saameyn ku yelan kartaa diiwaankaaga iyo/ama qiimaha gunooyinka qoyskaaga.

Haddii macluumaad aad bixisay la ogaado inuusan sax ahayn, waxaa lagu diidi karaa gunooyinka FoodShare iyo/ama waxaana lagugu soo oogi karaa xadgudub xatooyo oo la xariira inaad si cad u bixisay macluumaad qalad ah. Waxaa qasab kugu noqonaysa inaad bixiso gunooyin kasta oo aad heshay haddii aad bixiso macluumaad qalad ah. Haddii waxa ay FoodShare sheegto ay kasoo horjeedo xaqiiqda dhabta ah ee reerkaaga, macluumaadka codsiga, sida lambarka social security numbers (sagaalka lambar), waxaa laga yabaa in loo gudbiyo wakaaladaha federaalka, iyo sidoo kale wakaaladaha gaarka loo leeyahay, si ay ugu adeegsadaan hawlada sheegashada.

DIGNIINTA GANAAXA FOODSHARE

Qof kasta oo ka tirsan qoyskaaga oo si cad u buriya shuruudahaan soosocda waxaa laga xanibi karaa FoodShare muddo dhan 12 billood kadib marka koowaad ee aad ku xadgudubtid, 24 billood kadib xadgudubka labaad ama xadgudubka labaad ee ku lugta leh shey mamnuuc ah, ama xadgudub rasmi ah oo si kama danbeys ah loo xanibay.

- Bixinta macluumaad been ah ama inaad qarimid macluumaadka si aad u heshid gunooyinka FoodShare
- Ka ganacsiga ama gadida gunooyinka FoodShare
- Wax ka badelida kaararka si aad ugu hesho gunooyin aadan u qalmin
- Ku gadashada gunooyinka FoodShare waxyaabo aan ahayn cunto sida aalkohool amka tubaako
- Isticmaalida gunooyinka FoodShare, kaararka aqoonsiga qofka, ama dukumiintiyada kale oo uu qof kale leeyahay

Ayadoo ku xiran qiimaha lacagta gunooyinka FoodShare ee aad sida qaldan u isticmaashay, waxaad sidoo kale lagugu ganaaxi karaa \$250,000, ama in lagugu xukumdo xabsi dhan 20 sano ama labadaba. Maxkamad ayaa sidoo kale kaa mamnuuci karta FoodShare Wisconsin muddo 18 billood oo dheeraad ah. Si rasmi ah ayaa lagaaga xanibi karaa haddii lagagu qabto inaad ka ganacsanayso gunooyinka FoodShare oo dhan \$500 ama kasii badan. Ma awoodi doontid inaad ka qaybqaadatid FoodShare Wisconsin muddo dhan 10 sano haddii lagugu qabto inaad bixisay bayaan aan sax ahayn ama aad keentay aqoonsi qof kale ama aad heshay gunooyin badan isla mar. Ka caririda xadgudubyo ama dembiyo ama xadgudubyo aad sameysay oo sabab u noqonaaya inaad ka qayb noqon FoodShare Wisconsin. Waxaa sidoo kale lagugu xukumi karaa xukun dheeraad ah ayadoo la raacaayo xeerka federaalka ee quseeya.

Haddii aad ka ganacsatid (gadatid ama iibsatid) gunooyinka FoodShare ee lagu xakameeyo walxaha muqaadaraadka ah ama muqaadaraadka sharci darada ah, waxaa lagaaga xanibi doonaa barnaamijka FoodShare muddo dhan labo sano marka koowaad ee lagugu ogaado halka marka labaad si rasmi ah lagaaga xanibi doono. Haddii aad ka ganacsatid (gadatid ama iibsatid) hub, rasaas, ama qarax, waxaa si rasmi ah lagaaga joojin doonaa FoodShare Wisconsin.

CADDEYNTA LOO BAAHAN TAHAY

In la isku qoro FoodShare lama go'aamin doono ilaa dadka laga xaqiijiyo jawaabaha badan.

- Haddii xafiiska la isku soo wareysto, waa in la keeno waxyaabaha xaqiijinta ah ee liiska hoose.
- Haddii wareysiga la isaga qaado taleefanka, waxaa la soo diri doonaa liiska caddeymaha la iska rabo wareysiga ka dib.

Waxaa la is weydiin karaa waraaqo aan hoos ku qorneyn. Haddii ay sidaas dhacdo, waa in xafiiska lagu soo dirio liiska waxyaabaha kale ee la iska rabo. Haddii aadan helin waxyaabaha aad dooneyso, u sheeg wakaaladaada waxyaabaha aadan awoodin inaad hesho, kadib wakaaladaada ayaa ku caawin karta.

Waxyaabaha soo socda waa liiska tusaalayaal caddeyn ah:

Xaqiijinta/Sharciga Soogalootiga

- Leysanka darawalnimada
- Shahaadada dhalashada
- Baasaboorka ama kaarka muwaadinka Mareykanka
- Sharciga soogalootiga
- Jeegaga mushaarka
- Aqoonsiga Shaqaalaha
- Diiwaanka Isbitaalka

Lacagta Kusoo gashay

- Dhammaan jeegaga la helay 30 kii bari ee lasoo dhaafay
- Qoraal saxiixan oo ka socda shaqa-bixiye sida lacagta guud ee mushaarka iyo taariikhaha lacagta la qaadanayo ee 30ka maalmood ee soo socda.
- Foomka Xaqiijinta Lacagta Mushaarka Shaqaalaha

Qof Iskiis u Shaqeysta

- Waraaqihii canshuurceliskii ugu dambeeyey

Dakhli Kale

(tusaale, lacagta shaqa-la'aanta, ceymiska naafanimada, Social Security (Lacagta Hawlgabka), hawlgabnimo, manaafacaadka ciidanka hawlgabay, lacagta loo qoondeeyo ciidanka)

- Waraaqda Jawaabta
- Koobbig jeegii mushaarka ee ugu dambeeyey

Waxaa la is weydiin karaa waxyaabaha soo socda si laguugu xisaabo:

- Kharashaadka Guriga iyo Biilasha Guriga
- Caddeynta kirada guriga oo uu ku qoran yahay magaca iyo taleefanka milkiilaha guriga
- Waraaqaha ijaarka ama rahmaadda
- Waraaq ah canshuurta guriga
- Biilasha adeegyada guriga
- (Oo aad ka heshay ama lagaa siiyay gobal kale oo aan ahayn Wisconsin)
- Warqada amarada maxkamada ama diiwaano kale oo qarash
- Diiwaanada qarash bixinta ee gobal kale

Haddii aad jirto 60 sano ama kasi wayn tahay, aad tahay indhool, ama naafo, waxaa laga yabaa inaad heshid deyn aad iska bixiso lacagta caafimaadka qaar.

Kharashaadka iyo Qiimaha Caafimaadka

Kharashaadka caafimaadka iyo kharashaadka kale waxaa kamid ah, laakiin aan ku ekeen, waxyaabahaan soosocda:

- Adeegyada isbitaalka, caafimaadka, ilkaha, iyo indhaha
- Caymiska caafimaadka ee la damaanad qaaday, lacagta caymiska Medicare, iyo kharashaadka daawooyinka laguu soo qoray
- Daawooyinka qandho jabinta ama kuwa dhaqtar uu kusoo qoray
- Adeegyada Caafimaadka guriga iyo kalkaalisada guriga
- Qalabka Caafimaadka iyo sahayda
- Lacagta gaadiidka iyo kharashaadka jiifka si aad u heshid daryeel caafimaad
- Kharashaadka la xariira gaar ahaan adeegyada tababarka xayawaanka
- Lifeline/Medic Alert/Kharashaadka Digniinaha Caafimaadka marka uu soo qoro dhakhtarka
- Bayaanka Biilasha
- Risiitka macluumaadka guud
- Daawada ama dhalada kiniinada oo qiimuhu ku dul qoran yahay
- Caymiska caafimaadka oo muujinaya lacag bixinta, cida wax ka bixinaysa caymiska, nuqulka lacag bixinta, ama lacag dhimista
- Bayaanka kasoo baxay farmashi
- Gadaal ka bixinta lacagta oo uu aqbalay bixiyuhu
- Bayaanka kasoo baxay dhaqtarka oo uu ku caddeenaayo in daawada laga gaday koontarka ay ahayd mid uu qoray
- Kharashaadka loogu talagalay adeegyada kalkaalisada booqashada ku imaanaysa, shaqaalaha guriga, ama daryeelaha caafimaadka guriga
- Risiitka muujinaaya adeegyada jiifitaanka iyo/ama gaadiidka ee helida daaweynta caafimaad
- Biilka ama risiitka cuntada xayawaanada, tababarka, ama adeegyada cowska ee xayawaanka oo loogu talagalay adeega xayawaanka sida gaarka ah loogu tababaray

Hay'adaha gobalka ama deegaanka ee Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah (SNAP) iyo Barnaamijka Cunta Qeybinta ee Indian Reservation (FDPIR), iyo hay'adaha la hawlgala, waa inay soo dhajiyaan Bayaanka Takoor La'aanta ee soo socda:

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo sharciyada iyo qaynuunada xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salysan isirka, midabka, asalka qaran, jinsiga, (oo ay ku jiraan, aqoonsiga jinsiga iyo nooca jinsiga), caqiidada diimeed, naafonimada, da'da, aaminsanaanta siyaasadeed, ama aargoosiga ama aargudashada hawlo hore oo xuquuqaha madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, Hab qoraaleedka camoolaha, daabicidda farta waaweyn, cajalada maqalka, Luuqadda Dhagoolka ee Maraykanka), waa inay la xidhiidhaan hay'adda (gobalka ama deegaanka) ee ay dheefaha ka codsadeen. Shakhsiyaadka dhagaha la', maqalka ku adag yahay ama hadalka naafada ka ah ayaa la xidhiidhi kara USDA iyaga oo u maraya Federal Relay Service (Adeegga Dadka Dhagaha la' ee Federaalka) ee lambarka (800) 877-8339.

Si loo gudbiyo dacwada takoorka ee barnaamijka, Dacwad-qabaha waa inuu buuxiyo Foomka AD-3027, Foomka Dacwada Takoorka Barnaamijka ee USDA kaas oo onleen ahaan looga heli karo barta: <https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf>, xafiis kasta oo USDA ay leedahay, iyada oo la wacayo (866) 632-9992, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa inay leedahay magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka ee dacwad-qabaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee la soo eedeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqaha madaniga ah ee la soo eedeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in lagu diraa;

- (1) **boostada:**
Food and Nutrition Service, USDA
1320 Braddock Place, Room 334
Alexandria, VA 22314; ama
- (2) **fakiska:**
(833)-256-1665 ama (202)-690-7442; ama
- (3) **iimaylka:**
FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.